

PATIENT EDUCATION

Tilmaamaha Qorshaynta ee GI CentraCare Health – Plaza Surgery Center

Magaca Bukaanka: _____

Dhakhtarka: _____

Taariikhda Baaritaanka: _____ Nooca Baaritaanka: _____

Waqtiga La imaanaayo: _____

Goobta Baaritaanka

CentraCare Health Plaza Surgery Center – 320-229-4997

Ciwaanka: 1900 CentraCare Circle Suite 1900

Baakinka gaariga: Ku baakimo gaariga baakinka kuyaala dhammaadka waqooyiga CentraCare Health Plaza.

Is diiwaangelinta: Imoow miiska hore ee Surgery Center si aad isku diiwaan geliso baaritaanka.

Su'aalaha Baaritaanka: 320-229-4910

Is Diiwaangelinta

- Waxaa telefoon kuu soo diraya xafiiska diiwaan gelinta, si ay u dhameystiraan is diiwaan gelinta oo ay taas u dajajiso baaritaanka marka aad isbitaalka timaado.

Jadwalka

- Haddii aad dooneyso **in ka noqoto balanta, fadlan naga soo wac 320-229-4933 oo dooro qabsashada balanta.** Xafiiska balamada waxa uu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo.
- Haddii aadan ku imaan karin balanta, waxaanu kaa codsaneynaa in aan na soo wargeliso 48 saac ka hor.

Telefoonka balanta dhakhtarka ka horeeya

- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku soo wacaya 5-7 maalmood kahor balanta baaritaanka. Waxa ay su'aalo kaa weydiinayaan waxyaabaha kaa caawin kara u diyaargarowga baaritaanka, waxayna kaala hadlayaan caafimaadkaaga, kaana caawinayaan in aad fahamto daawooyinka aad qaadan karto iyo kuwa aadan qaadan karin ka hor baaritaanka.
- Haddii aad WAX su'aal ka qabto tilmaamaha baaritaanka, fadlan soo wac telefoon lambarada ku qoran warqadaada xaqiijinta ballanta, Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo.

Baaritaanka ka hor

- La xiriir ceymiskaaga si aad u hubiso in ay bixinayaan kharashka baaritaanka. Kala xiriir lambarka telefoonka ee dhinaca dambe ee kaarka ceymiska.

Macluumaadka wadaha gaariga

- Waa inuu kula socdaa wade gaari oo da'diisu tahay 18 ama ka weyn marka aad dhakhtarka timaado. Haddii aadan heysan wade gaari, waxaa suuro galin balanta dib loo dhigo.
- **Laguuma ogolain** aad gaarigaaga ku tagto gurigaaga. Laguuma **ogola** in aad gaari wado, tagsi ama bas aad raacdo, ama ka tagto kaligaa Qeybta Baaritaanka jirka kaligaa.

- Taksi waad u qaadan kartaa guriga iyada oo **qof weyn** oo mas'uul ah kula socdo.
- Haddii aadan heli karin **qof gaariga kugu wada oo mas'uul ah** (qof qoyska ka tirsan ama saxiib) oo guriga ku geeya, baaritaankaaga waxaa la sameynayaa iyada oo aan lagu suuxin ama balanta dib ayaa loo dhigi doonaa.
- Waxan Ka coodsaneyna qof inuu kula joogo 24 saac ka bacdi qalitanka madamo aah dawada oo la'guguu seexinayo waxay keeni karta sameeyn jiirkaga, xasuustada, iyo awooda go'aan qadashada oo amiin eeh.
- Laguuma **ogola** in aad shaqada ku noqoto, gaari waddo, ama makiinado ku shaqeyso maalinta baaritaanka. Ha cabin khamri hana saxiixin wax qoraal ah oo sharci ah 24 saac kadib suuxdinta.
- Ka hor inta aadan ka tagin goobta baaritaanka, calaamadaha aasaasiga ah ee jirka waa inay noqdaan kuwo caadi ah.

Fariimo gaar ah/ Tilmaamo kale: